

KALIFORNIYA WAXAY BEDDELAAYSAA SIDA AY U BIXISO KHARASHAADKA DARYEELKA CARRUURTA!

Si loo kordhiyo natiijooyinka wanaagsan ee carruurta, qoysaska, iyo shaqaalaha bixiyaha daryeelka hore iyo waxbarashada, California waxay dejin doontaa sicirada lacag bixinta kaalmada daryeelka carruurta oo lagu wargelinayo kharashaadka daryeelka, iyadoo laga guurayo sicirka suuqa.

Waaxda Adeegyada Bulshada ee California (CDSS) waxay la shaqaynaysaa khubaro heer qaran ah, Prenatal to Five Fiscal Strategies (P5), si ay u qaabeeyaan oo ay u hirgeliyaan geedi-socodka [habka beddelka ah](#).

HABKA

Geedi-socodka habka beddelka ah ee CA ayaa Gobolka ka caawin doona:

- Fahmida qarashka ku baxa adeeg-bixiyayaasha iyo barnaamijyada inay bixiyaan adeegyada daryeelka iyo waxbarashada.
- Samaynta qalab gacan ka geysan doona in la qiyaaso qarashka daryeelka iyadoo lagu salaynayo macluumaadka laga soo ururiyay adeeg-bixiyayaasha iyo ilo kale. Qalabkani wuxuu qiyaasi doonaa qarashka daryeelka ee noocyada kala duwan ee barnaamijyada iyadoo la isticmaalayo doorsoomayaa sida cabbirka barnaamijka, goobaha juqraafiyeed, iyo da'da carruurta loo adeego.

Waxa jira Shan Waji oo Geedi-socodka Habka Beddelka ah:

1. La xiriirista qoysas kala duwan, adeeg-bixiyayaasha, iyo bulshooyinka.
2. Macluumaad aruurin iyada oo loo marayo ra'yi-aruurin, kal-fadhiyo fikrad dhiibasho, iyo ilo kale.
3. Samaynta qalab isticmaala macluumaadkaas si loo qiyaaso qarashka daryeelka.
4. Daraaseynta natiijooyinka si loo fahmo kala duwanaanshaha qarashka daryeelka.
5. Wax ku biirinta sida uu gobolku u dejiyo qarashyada iyo shuruucda.

1 Ka qaybgeli adeeg-bixiyayaasha, qoysaska, iyo bulshada

2 Aruuri ra'yi-bixin oo ururi Xogta

3 Samee Qaabka Qaranshka

4 Dhagangeli Isku-dhafka

5 Shuruucda iyo Dejinta Qarashka waxaa lagu wargeliyay

KA-QAYBGELINTA

CDSS iyo P5 waxay la hawlgeli doonaan oo ay baran doonaan adeeg-bixiyayaasha/shaqaalaha daryeelka hore iyo waxbarashada, qoysaska, iyo hawlgalayaasha ku sugan Gobolka oo dhan, gaar ahaan kooxaha jinsiyad, qowmiyad, iyo luqad ahaanba matalaadoodu yar tahay, kuwaas oo ku nool gobollada juqraafi ahaan aan si fiican loogu adeegin, iyo bulshooyinka la takooro.

Si loo fahmo qarashka saxda ah ee daryeelka, CDSS iyo P5 waxay fikrad dhiibasho iyo ka qaybqaadasho uga baahan doonaan adeeg-bixiyayaasha kala duwan ee daryeelka hore iyo waxbarashada, oo ay ku jiraan xarumaha daryeelka iyo kobcinta carruurta, guryaha daryeelka carruurta qoyska, barnaamijyada qabiilka, iyo daryeel-bixiyayaasha qoyska, saaxiibada, ama deriska ah ee aan laysin laga rabin iyo sidoo kale qoysaska. CDSS iyo P5 waxay bixin doonaan fursado badan oo ka qaybqaadasho inta lagu jiro shanta weji ee geedi-socodka habka beddelka ah.

Xogta waxa kaliya oo loo wadaagi doonaa si kooban oo xogta barnaamijka gaarka ah waxa lagu ilaalin doonaa sir oo aan lala wadaagin wixii ka dambeeya P5

Guddiga Talo-ka-Bixinta Sicirka & Tayada

CDSS waxay samaysay Guddiga Talo-ka-Bixinta Sicirka & Tayada ee Kaalifoorniya si ay Gobolka u siiyaan talo ku saabsan dejinta sicirka kaalmada daryeelka carruurta. P5 waxa ay daadi'inaysaa kulamada guddiyada, kuwaas oo dhici doona labadii biloodba mar, waana kulamo u furan dadweynaha, waxaana lagu dari doonaa wakhti loogu talagalay in dadweynaha ku dhiibtan fikradooda/faallooyinkooda. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Guddiga, oo ay ku jiraan faahfaahinta kulamada iyo wixii macluumaad ah, iyo sida looga qeybqaadan karo ayaa laga heli karaa halkaan hoose.

MACLUUMAA DHEERAAD AH

Kulamada Guddiga Talo-ka-Bixinta Sicirka iyo Tayada: <https://cdss.ca.gov/inforesources/child-care-and-development/rate-reform-and-quality>

Si aad u hesho wixii macluumaad ah ee ku saabsan habka beddelka ah, iyo si aad ula xiriirto P5, booqo: <http://www.prenatal5fiscal.org/california>